

Adigu dooro mustaqbalkaaga!

Tani waa waqtigii ku habboonaa in xoogga la saaro waxbarashada

Suuqa shaqada ee Borlänge waxa uu u socdaa dhanka mustaqbal ifaya. Borlänge, shirkado cusub ayaa soo degi doona oo horu marin doona hawlahooda, oo ay ku jiraan Northvolt iyo bakhaarka ICA. Shirkado badan oo kale oo ku yaal Borlänge ayaa iyaguna raba in ay shaqaaleysiiyan dad badan. Taas macnaheedu waxa weeye in ay fududaan doonto in Borlänge shaqo laga helo sannadaha soo socda, waxaa la rumaysan yahay in ay jiri doonto shaqaale yaraan. Sidaa darteed waa waqtigii ku habboonaa in la maalgeliyo waxbarashada – taasina waa mid wanaagsanaan doonta ! Si aad shaqo u hesho, waxa had iyo jeer loo baahan yahay in aad waxbarasho leedahay. Haddii aad rabto in aad tababarto, waxaa jira dhawr ikhtiyaar oo ku dhex jira waxbarashada dadka waaweyn.

SFI

Sii wanaaji adiga Iswidhishkaaga! Iska diiwaan gelintumar kastaa waa ay furantahay.



Waxbarasho xirfadeed oo uu afka Iswidhishku la socdo

Baro Iswidhishka isla marka aad ka qayb galayso waxbarashada farsamada gacanta.

Waxaad ku tababararan kartaa xagga ama gudaha:

- *Carruur ilaaliye*
- *Hawladeenka CNC*
- *Waxbarashada dhismaha*
- *Alxan yaqaan*
- *Daryeel iyo sii xannaaneeyn*
- *Gods, lager- och terminalarbetare*

Koorsooyin heer dugsi hoose dhexe ah

Akhri tusaale. Iswidhish, Ingiriisi ama xisaab si ay adiga kuugu diyaariyaan waxbarasho xirfadeed ama shahaado dugsi sare.

Waxbarashada xirfadda

Waa jid degdeg ah oo loo maro shaqo. Waxaa jira waxbarasho xagga farsamada oo ku saabsan farsamada casriga ah, daryeelka, makhaayadda, dhismaha, hoteelka. Waxbarashadu dhererkeedu waa inta u dhaxaysa 20 iyo 70 toddobaad.

Waxbarashada dugsiga sare.

Adigu ma waxa aad dooneysaa jaamacad xirfadeed ama kulliyad/jaamacad? Markaas inta badan waxa aad adigu u baahan tahay shahaado dugsi sare. Annagu waxa aannu adiga kaa caawineynaa in aad sameyso qorshe imtixaan.

Xilliyada codsiga iyo billaabashada koorsada 2024

<u>Waqtiga codsiga</u>	<u>Billaabashada koorsada</u>
23 oktoobar – 26 nofeembar	8 janaayo
15 janaayo – 11 febraayo	18 maarsoa
25 maarsoa – 21 abriil	27 meey
29 abriil – 2 juunyo	agoosto
19 agoosto – 27 sibteembar	oktoobar

Xarunta adeegga ee Röda vägen 50 ayaa kaa caawin karta in aad adigu codsato waxbarashada aannu annagu hayno.

Xarunta adeegga

Telefon: 0243-740 00

E-post: kommun@borlange.se

Cinwaanka booqashada: Röda vägen 50

Xarunta hagidda ardeyda waxa ay kaa caawin karaan in aad adigu hesho waxbarasho sax ah

La soo xiriir Xarunta hagidda ardeyda haddii aad adigu rabto caawimaad ku saabsan sidii aad ku heli lahayd waxbarasho sax ah oo adiga ah. Iyada oo uu ku caawinaayo Lataliye xirfadeed waxa aad adigu sameeyn kartaan hal qorshe oo ku saabsan jidkaaga waxbarashada.



Isticmaal furaha-QR si aad ula soo xiriirto xarunta jiheeynta ardeyda



BORLÄNGE